

KU:Xafiiska Xeerilaaliyaha Guud Ee Qaranka.

Og; Maxkamadda Gobolka Banaadir

Ujeedo:Wakaalad Qareen Dacwo Ciqaab ah (been abuur)

Maanta oo ay taariikhdu tahay 23/04/2025, Anigoo ah Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Taajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- MUHIDIN HAGI ALI, Ina Xaliima Jaamac Jimcaale, Somali ah, Ku Dhashay Muqdisho 15/10/1968, Sita Somali Passport Lr. P01266817, Kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadqaha Soomaliya

LA WAKIISHE:- AVV.Dr.AXMED MAXAMED SH.IBRAHIM (Dr.Koofi)

B- Anigoo ah **MUHIDIN HAGI ALI**, sawirkeeyguna ku daabacanyahay Aatadaan, oo ka Feyow Caqliga, Maskaxda, Qalbiga iyo Jirka oo idil, raalina ku ah bixinta wakaaladaan dacwada ee soo socota, ayaan waxaan qoraalkaan Xafiiska hortiisa ku caddeynayaa inaan siiyay Wakaalad dacwo **AVV.DR.AXMED MAXAMED SH.IBRAHIM (DR.KOOFI)** una wakiishay Wakaalad dacwo ciqaab ah ee ka dhex-dhalatay dacwo madani ah ee leh **Gal Lambar-MGB/150/2022-B>G**, in uu oogo dacwadaas ciqabta ah si waafaqsan sharciga, Xafiiska Xeerilaaliyaha hortiisa iyo sidoo kale maxkamadda gobolka horteeda.

T- Aniga oo ah **AVV.DR.AXMED MAXAMED SH.IBRAHIM (DR.KOOFI)**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey **MUHIDIN HAGI ALI**, islamarkaana aan Kilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

MUHIDIN HAGI ALI



1- ABDULLAHI AHMED ABUKAR




SAXIIXA LA WAKIISHAHA

AVV.DR.AXMED MAXAMED SH.IBRAHIM (DR.KOOFI)



2- AHMED HASSAN MURSAL



(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 1532/T.P.N/25, Tr. 23/04/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **MUHIDIN HAGI ALI** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **AVV.Dr.AXMED MAXAMED SH.IBRAHIM (DR.KOOFI)** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Nootayo"





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 20/10/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/laahi Abuukar Mursal** oo ka Wakiil ah La Wakiishe **AVV.Dr.AXMED MAXAMED SH.IBRAHIM (Dr,KOOFI)** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1532/T.P.N/25, Tr. 23/04/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	AVV.Dr.AXMED MAXAMED SH.IBRAHIM (Dr,KOOFI)
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixiyaha Muxyadiin Xaaji Cali
Taariikhda Wakaalada	23/04/2025

Wakiilka La Wakiishe: Aniga oo ah **C/laahi Abuukar Mursal** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaday Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay uuna leeyahay **AVV.Dr.AXMED MAXAMED SH.IBRAHIM (Dr,KOOFI)**.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/laahi Abuukar Mursal